Diintu waa naseexo

Tamiim Adaari Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Diintu waa naseexo " waxaan ku niri: yey u tahay: wuxuu yiri: " Ilaahay, Kitaabkiisa, Rasuulkiisa, Madaxda Muslimiinta, iyo guud ahaan Muslimiinta oo dhan "

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay Diintu ku dhisan tahay ikhlaas iyo run, si loogu guto sidii Ilaahay u waajibiyey oo kaamila ee aan laga gaabin ama la qishin. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa lagu yiri: yey u tahay naseexo? wuxuuna yiri: Tan kowaad: Ilaahay ayey u tahay isagaa koreeya oo nusqaan ka hufane: waana in loo khaalis yeelo camalka oo aan loo shariig yeelin ", oo aanu rumayno Rabinimadiisa, Ilaahnimadiisa, Magacyadiisa, Sifaadkiisa, arinkiisa oo la weyneeyo iyo dadkoo la gaarsiiyo inay Ilaahay rumeeyaan. Tan labaad: kitaabkiisa Qur'aanka ah: ayey u tahay: waana inaan aamino inuu hadalkii Ilaahay yahay oo kii kutubtiisa u danbeeyey yahay, iyo inuu nasakhay dhamaan Shareecooyinkii isaga ka horeeyey, waa inaan weynayno oo si wanaagsan u akhrino oo ku camal falo Quraanka Muxkamkiisa, oo aanu u hogaansamo Mutashaabihiisa, oo aanu ka tagno kuwa Quraanka qaloociya oo bedela, waa inaan ku cibro qaadano waanadiisa, oo cilmigiisa faafino, dadkana ugu yeerno. Tan seddexaad: waxay u tahay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: taasoo ah in la rumeeyo inuu yahay kii u dambeeyey Rususha, oo aan rumayno wuxuu la yimid, oo aanu amarkiisa qaadano, wuxuu naga reebayna ka harno, oo aynaan Ilaahay ku caabudin wixii Nabigu la yimid maahee wax kale, oo Nabiga xaqiisa weynayno, oo Nabiga maamuusno, oo dacwadiisa fidino, oo Shareecadiisa faafino, oo tuhunka ka difaacno. Tan afraad: Madaxda Muslimiinta ayey u tahay: taasoo ah in xaqa loogu kaalmeeyo, oo aan lagu qabsan Madaxtinimada, waana in la maqlo oo lagu adeeco Sharciga Ilaahay. Tan shanaad: Muslimiintoo dhan ayey u tahay naseexo: waana in loo ixsaan falo oo khayrka loogu yeero, oo dhibka laga daayo, oo khayrka lala jeclaado, oo baarinimo iyo taqwo lagula dhaqmo.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/4309